

## Muhiim ah: Wadatashi ku saabsan magac badalashada wadada

15 Janaayo 2021

### Magac u badalida wadada Black Boy Lane ilaa La Rose Lane

Waxaan warqad kuugu soo qorayaa iyadoo laxiriirta soo jeedinta ah in magaca dariiqaada la badalo. Wadatashigeenii hore - oo aan weydiinay in dadka deegaanka ay doorbideen magaca 'La Rose Lane' ama 'Jocelyn Barrow Lane' - waxay muujisay in **dadka deegaanka ay doorbideen magaca 'La Rose Lane'**.

Waxaan hadda u gudbeynaa wejiga xiga ee wadatashiga oo ku saabsan in magaca waddada uu sii ahaado Black Boy Lane ama loo beddelo 'La Rose Lane'

La-tashiga waxaa lagu sameynayaa qeyb ka ah Dib-u-eegista ballaaran ee ku saabsan Taalladaha, Dhismaha, Meelaha iyo Magacyada Waddooyinka ee Haringey. Tani waa shaqo muhiim ah oo aan ku eegayno habab badan oo hal abuur leh oo loogu dabaaldegayo dhaqanka iyo kala duwanaanta aan ku faanno degmadeena. Waxaan ognahay inay jiraan fikrado dhowr ah iyo qaabab aan tan ku sameyn karno, latashigani wuxuu fursad u yahay inaan ku maqalno fikradahaaga iyo jawaab celintaada soojeedinta qaaska ah ee ku saabsan in Black Lane loo beddelo 'La Rose Lane' dabaaldega John La Rose, oo hore u deganaa Haringey, daabiciye, qoraa iyo gabayaa.

Wadatashigu wuxuu furanyahay **15 ka January 2021 ilaa 19 ka February 2021**.

Muddadan, waxaad ku dhammaystiri kartaa sahanka khadka tooska ah

[www.haringey.gov.uk/renaming-black-boy-lane](http://www.haringey.gov.uk/renaming-black-boy-lane), warqad u qor Isuduwaha Wadatashiga ee Golaha, Kooxda Isgaarsiinta, Golaha Haringey, River Park House, 225 High Road, Wood Green, London, N22 8HQ ama emayl ugu soo dir Koonsalka

[bbiconsultation@haringey.gov.uk](mailto:bbiconsultation@haringey.gov.uk) adigo sheegida diidmadaada ama taageerida amarka la soo jeediyey.

Tixgelinta in magaca waddada la beddelo waa nidaam rasmi ah. Oo markaa wejigani wuxuu ku lug leeyahay daabacaadda 'ogeysiiska ujeedkeenna' si aan u sameyno amar loogu badalo magaca Black Boy Lane ila La Rose Lane, iyo in lagala tashado fikradahaaga ku saabsan in magaca-beddelka uu sii socon doono iyo in kale. Natijoooyinka la-tashiga waxay ka mid noqon doonaan go'aan ka gaarista haddii la sii wado isbeddelka iyo in kale. Nuqul ka mid ah ogeysiiskayaga ujeedka ayaa ku lifaaqan warqaddan. Tani waa shuruud sharci ah oo hoos timaada Qeybta II Faqrada 6 ee Sharciyada Dhismayaasha London (Wax ka beddel) ee Xeerka 1939.

Intii lagu gudajiray hawsha wadatashiga ilaa maanta waxaan tixgelin siinay ra'yi celintaada waxaanna ogaannay in qaar idinka mid ah ay weli welwel qabaan. Waxaan weli naga go'an inaan dhageysanno fikradaha dhammaan dadka deggan ee ku saabsan arrintan muhiimka ah waxaan kugu dhiirrigelinaynaa inaad ka jawaabto wadatashiga.

### Taageero Golaha adigmado kuu fidinayo

Waxaan rabnaa inaan kuu xaqiijinno taas, haddii magaca la beddelo uu horay u sii socdo:

- Kawnsalka Haringey wuxuu ogeysiin doonaa inta urur ee aan kari karno anaka oo ku matalayna
- Lambarkaaga boosta iyo lambarka gurigaagu isma beddelayo
- Dukumiinti rasmi ah oo Magacaabista Waddada iyo Amarka Lambaraynta ayaa la bixin doonaa

- Goluhu wuxuu ku siin doonaa caawimaad wax ku ool ah iyo taageero inta lagu jiro nidaamka beddelka magaca
- Beddelista magaca dariiqa ma saameyn doono xaaladda deganaanshaha deggane kasta
- Reeraha / ururada waxaa la siin doonaa 'lacag bixinta ikhtiyaariga ah ' oo ku saabsan dhibkooda

Waxaan ka fiirsaneynaa in aan bixinno lacag ikhtiyaari ah oo qiyaastii ah £ 300 qoyskiiba / urur kasta wixii dhib ah ee magaca la beddelo keeni karo. Waxaan rajeyneynaa in waqtiga u dhigma iyo kharashka ku baxa inta badan, haddii aaney ahayn dhammaantood, qoysaska / ururadu ay aad uga yaraan doonaan tan. Haddii aad wax ra'yi ah ka qabto lacag-bixintan ama taageero kale oo loo baahan yahay, fadlan ku dar faallooyinkaas jawaabta wadatashigaaga.

## Maxaa looga badalay magaca Black Boy Lane?

Golaha Haringey wuxuu rumeysan yahay in magacyada taallooyinkayada, dhismayaashayada, meelaha iyo jidadka ay tahay inay muujiyaan qiyamka iyo kala duwanaanta aan ku faanno degmada dhixdeeda. Micnayaasha ayaa isbadala mudu ka dib, ereyga "Black Boy" ayaa hada inta badan loo isticmaalaa magac sharaf dhac ah oo loogu talagalay ragga ku abtirsada Afrika. Runtu waxay tahay, hadii aan hada magacaabi lahayn dariiqa, kuma aqaanayno "Black Boy", oo aan loo eegin sababaha taariikheed ee ka dambeeya magacaabista in ka badan qarni ka hor, jaaliyad ahaan, bulsho ahaan, waxaan leenahay si aad uweydiiso inuu weli magaca waddada ku habboon yahay iyo in kale.

Goluhu waxaa ka go'an inuu tallaabo ka qaado labadaba wax ka qabashada sinnaan la'aanta iyo u dabaaldega kala duwanaanshaha hodanka ah ee degmadeena. In kasta oo aan garwaaqsan nahay inay jiraan xoogaa dhibaato ah haddii magaca dariiqa la beddelo, tani waa inay ahaataa mid isku dheelitiran oo ka dhan ah saamaynta ay ku yeelan karaan kuwa ka tirsan bulshadayada ee ugu yeeray Golaha inay dib u eegaan magaca.

In kasta oo aan ka mahadcelinno in xilligan ay ku adag tahay qof walba, oo ka jawaabidda la-tashiga sida tan oo kale ay noqon karto mid aad u dhib badan, waxaan aaminsanahay in hadda, in ka badan sidii hore aan u dooneyno inaan dirno farriin cad oo lagu taageerayo kala duwanaanta degmadeena.

Salaan wacan.



Rob Krzyszowski

Kaaliyaha Ku-meelgaarka ah ee Qorshaynta, Heerarka Dhismaha iyo Joogtaynta

## Kajawaab Wadatashiga ama Nala Soo Xiriir

**WEBSITE** [www.haringey.gov.uk/renaming-black-boy-lane](http://www.haringey.gov.uk/renaming-black-boy-lane)

**EMAIL** [bbiconsultation@haringey.gov.uk](mailto:bbiconsultation@haringey.gov.uk)

**TELEFOONKA** 0208 489 3797

**POST** Isuduwaha Wadatashiga, Kooxda Isgaarsiinta, Haringey Council, River Park House, 225 High Road, Wood Green, London, N22 8HQ.

*Bokhshad bilaash ah ayaa lagu lifaaqay si ay tan uga caawiso haddii aad u baahato.*

**KULAN QALAAB CASRIYAYSAN** Shuruudaha kala fogaynta bulshada darteed, a 'Virtual' kaqeybgalka khadka tooska ah ee internetka ayaa la qaban doonaa 11.30am Sabtida 23-ka Janawari 2021 iyadoo loo marayo Microsoft Teams. Tani waxay u oggolaan doontaa dadka deegaanka / ururrada inay weydiiyaan saraakiisha Golaha wixii su'aalo ah. Kuwa jecel inay kaqeyb galaan kulanka waa inay email u diraan [bbiconsultation@haringey.gov.uk](mailto:bbiconsultation@haringey.gov.uk) si ay isodiiwaan geliyaan si ay uga qaybqaataan.

---

## Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo (FAQs)

**S: Waa kuma John La Rose?**

**J:** Black Boy Lane ayaa la soo jeediyay in loo bixiyo 'La Rose Lane' oo lugu magac darayo John La Rose.

John La Rose wuxuu ahaa daabaca, abwaan iyo qoraa. Wuxuu aasaasay Dhaqdhaqaaqa Farshaxanada Kariibiyaanka ah iyo shirkadda daabacaadda ee New Beacon Books oo ku leh buug-ganacsi buugaagta Stroud Green. Sannadkii 1975, wuxuu aasaasay Dhaqdhaqaaqa Waalidiinta Madoow asal ahaan waalidiinta ku lugta lahaa dhacdadii Dheeraadka ee Dugsiga George Padmore, taas oo wiil yar oo skooltagee madow ah uu boolisku ku garaacay bannaanka iskuulkiisa Haringey.

Taariikh nololeed aad u faahfaahsan ayaa laga heli karaa boggayaga oo ku yaal [www.haringey.gov.uk/renaming-black-boy-lane](http://www.haringey.gov.uk/renaming-black-boy-lane).

**S: Maxaa xigi doona?**

**J:** Marka wadatashigu xirmo, waxaan si taxaddar leh u falanqeyn doonnaa dhammaan jawaabaha waxaana warbixin la siin doonnaa Guddiga Iskaashatada ee Golaha oo go'aan ka gaari doonta haddii lagu sii wado isbeddelka iyo in kale. Haddii in magaca la beddelo la isku afgarto, waxaan ogeysiin doonnaa dadka deegaanka iyo ururrada waxaanan bixin doonnaa macluumaad dheeri ah iyo taageero ku saabsan saameynta, waqti fiican ka hor inta uusan isbeddelku dhaqan-gelin dabayaaqada 2021. Goluhu wuxuu ballan-qaadayaa inuu ku taageerayo deggenyaasha iyo ururrada tan, haddii isbeddelka lagu heshiiyo

**S: Lambarkayga boostada iyo lambarka gurigeygu ma isbedelayaa?**

**J:** Maya. Lambarka Tixraaca Waddada Gaarka ah (USRN) ee waddadu sidoo kale wuu ahaan doonnaa sidiisii, oo ay adeegsadaan ururo badan.

**Ma u baahanahay inaan ku wargeliyo Royal Mail isbeddelka magaca waddada?**

**J:** Maya. Koonsilku wuxuu ogeysiin doonnaa Royal Mail isbedelka cinwaanka. Sababtoo ah koodhkaaga boostu isma beddelayo, isbeddelka magaca waddada, waa inuusan saameyn ku yeelan waraaqaha ama baakadaha lagu soo diro Royal Mail. Shirkadaha utility iyo kuwa kale waxay ka iibsadaan liisaska cinwaanka Royal Mail.

**S: Hay'addee ayaan u baahan doonnaa inaan ka warbixiyo beddelka cinwaanka? Sidee Koonsilku ii caawin doonnaa?**

**J:** Goluhu wuxuu ku wargalin doonnaa inta urur ee aan kari karno anagoo ku hadlayna magaca dadka deegaanka waxayna bixin doonaan caawimaad wax ku ool ah iyo taageero, haddii isbeddelka lagu heshiiyo, oo ay ku jiraan dukumiintiyada 'pro-forma' si loogu diro ururada ay khuseyso.

Deganayaasha sidoo kale waxay yeelan doonaan qof magacaban oo aad lahadli karto haddii aad la kulanto wax dhibaato ah ama aad ubaahantahay taageero gaar ah.

Ururo badan ayaa adeegsada Macluumaadka Cinwaanka Qaranka oo markaa faahfaahintaada si otomaatig ah ayaa loo cusbooneysiin doonnaa haddii ay isticmaalayaan macluumaadka ugu dambeeyay. Dhamaan ururada dowlada hada waa inay isticmaalaan AddressBase (Gudiga GeoSpatial - qeyb kamid ah Xafiiska Golaha Wasiirada) kaasoo Goluhu sidoo kale hubin doono in si otomaatig ah loo cusbooneysiyo.

Si kastaba ha noqotee, waxaad wali u baahan doontaa inaad adigu la socodsiiso hay'adaha qaarkood.

Waxaan ku soo bandhigi doonaa nuqulada Amarka magaca beddelka rasmiga ah, kaasoo caddayn u noqon doona beddelka magaca. Waxaan sii wadeynaa aruurinta liis warbixineed oo faahfaahsan oo ururrada ah laakiin ururada muhiimka ah ee laga fekerayo, oo ay ku jiraan kuwa ay Koonsilku magacaaga kula soo xiriiri doonaan, waxaa ka mid ah:

- Cinwaanada lalaxiriira akoonnada wax looga iibsado internetka iwm
- Shirkadaha tasiilaadka sida; internetka, telefoonka, korontada, gaaska, biyaha
- Canshuurta Golaha
- Dugsiyada / Waxbarashada
- Adeegyada doorashooyinka
- Shaqooyinka iyo shaqada / lacagta kaalmada
- Xisaabaadka bangiga
- Amaahda guryaha
- Caymiska: guriga, waxyaabaha ku jira, baabuur, iwm
- Macluumaadka NHS / GP / isbitaalka / farmashiyaha
- Diiwaanka Dhulka ee Buqortooyada (HMLR)
- Dakhliga & Cashurta Boqortooyada (HMRC)
- Wakaaladda Shatiga Darawalnimada & Gawaarida (DVLA)
- Heshiisyada kireysiga, heshiisyada dhigaalka iwm
- Dardaaran, diiwaan-gelinno iyo dukumentiyada kale oo sharci ah
- Home Office / Xafiiska Baasaboorka HM / dukumiintiyada socdaalka / fiisada
- Faahfaahinta xigtada
- Ururada / ganacsiyada / iskood u shaqeysta - Guryaha Shirkadaha, websaydhada, xafiisyada xafiisyada, xisaabaadka ganacsiga, qaansheegadka, qandaraasyada

**S: Koonsalku ma dib ayuu iiga soo celin doonaa kharashka ku cusboonaysiinta macluumaadkayga ururada?**

**J:** Waxaan ka fiirsaneynaa in aan bixinno 'lacag bixin Ikhtiyaari ah' oo ku dhow £ 300 qoyskiiba / urur kasta oo dhib ah ee magaca la beddelayo uu sababi karo. Waxaan rajeyneynaa in waqtiga u dhigma iyo kharashka ku baxa inta badan, haddii aaney ahayn dhammaantood, qoysaska / ururadu ay aad uga yaraan doonaan tan.

Jaantuskan lama dhameystirin markaa haddii aad wax fikrad ah ka bixiso lacag-bixintan ama taageero kale oo loo baahan yahay, fadlan ku dar faallooyinkaas jawaabta wadatashigaaga.

**S: Ma jiri doonaan taarikooyin magac cusub oo waddooyin ah?**

**J:** Haa, Koonsilku wuxuu bixin doonaa taargooyinka magacyada waddooyinka, oo muujinaya magaca cusub haddii isbeddelka la oggolaado. Kawnsalku wuxuu kaloo ku wargalin doonaa Gaadiidka London isbeddelka waxayna mas'uul ka noqon doonaan inay hubiyaan in TfL ay cusbooneysiyaan dhammaan macluumaadkooda khuseeya, oo ay ku jiraan joogsiyada basaska ee u dhow.

**S: Tani miyey saameyn ku yeelan doontaa degaanshahayga, xaaladda socdaalka ama Visa UK?**

**J:** Meesha ay wax ka bedelayaan magaca wadada oo dhan uu dhaqan galo, hadaad horey u codsatay ama aad kujirto howsha aad ku dalbaneyso fiisaha UK, waxaad u baahan kartaa inaad cusboonaysiiso cinwaankaaga oo qayb ka ah dalabkaaga. Golaha Haringey wuxuu ku siin doonaa Magacaabista Dariiqa iyo Amarka Nambarada cadayn rasmi ah ee isbeddelka la adeegsanayo marka la cusbooneysiinayo faahfaahintaada, iyo wixii kale ee taageero ah ee ficil ah ee tan lagu sameeyo. Tan waxaa lagu sameyn karaa khadka tooska ah wax kharash ahna ma jiro.

**S: Maxaad wadatashi kale u samaynaysaa?**

**J:** Wadatashigii hore wuxuu weydiistay dadka degan Black Boy Lane inay si ku meel gaar ah u kala doortaan labada magac ee cusub - La Rose Lane iyo Jocelyn Barrow Lane. Maaddaama dadka deegaanku doorteen La Rose Lane, kani waa magaca loo qaaday wejiga xiga.

La-tashigani waa la-tashi sharci ah oo looga baahan yahay sida uu qabo Qeybta II Qeybta 6 ee Sharciyada Dhismayaasha London (Wax-ka-beddel) ee Xeerka 1939 iyo halkaasoo dadka deggan ay ka dhiidhin karaan diidmo ama taageero soo jeedinta ah in magaca Black Boy Lane loo beddelo La Rose Lane. Koonsilku waa inuu tixgaliyaa kuwa laqaatay kahor intuuusan go aan kama dambays ah gaadhin bal inuu badalo magaca wadada.

**Ogeysiiska ujeedka ah in la sameeyo amar lagu magacaabayo  
jidadka hoosta Sharciyada Dhismayaasha London (Wax ka beddel)  
Sharciga 1939 Qaybta II Qaybta 6**

**Degmada London ee Haringey  
Sharciyada Dhismayaasha London (Wax ka beddelka) Sharciga 1939  
Qaybta II Qaybta 6  
Magacaabida Wadooyinka**

OGEYSIIS waxaa halkan lagu bixiyay in GOLAHA HARINGEY EE LONDON ("Golaha"), iyadoo la raacayo Sharciyada Dhismayaasha London (Waxkabelka) Sharciga 1939 Qaybta II Qaybta 6, waxay damacsan tahay inay sameeyso amar lagu badalayo magaca dariiqa Black Boy Lane oo laga dhigayo La Rose Lane sida ku xusan 0 hoosta.

Qof kasta oo diidmo ka qaba amarka loogu tala galay wuxuu ugu dambayn 19 Febraayo 2021 u qori karaa Golaha Isuduwaha Wadatashiga, Kooxda Isgaarsiinta, Haringey Golaha, River Park House, 225 High Road, Wood Green, London, N22 8HQ ama khadka tooska ah [www.haringey.gov.uk/renaming-black-boy-lane](http://www.haringey.gov.uk/renaming-black-boy-lane) ama emayl u soo dir Koonsilka [bbiconsultation@haringey.gov.uk](mailto:bbiconsultation@haringey.gov.uk) iyagoo sheegaya diidmadooda amarka.


Taariikh: 15 Janaayo 2021

**Sharaxaadda iyo xaaladda waddada:** Black Boy Lane; inta udhaxeysa Wadooyinka West Green iyo St Ann

**Tixraac iyo midab khariidada:** Midab casaan ah leh khariidada  
**Magaca la doonayo** La Rose Lane



Stephen Lawrence-Orumwense (Head of Legal Services (Social Care & Contracts) and Deputy Monitoring Officer) for and on behalf of John Jones Head of Legal and Governance (Monitoring Officer), Haringey Council  
Legal Services Alexandra House, 10 Station Road, Wood Green, London N22 7TR



Copyright Xuquqda daabacaadda Crown ee London Haringey  
Lambarka Shatiga OS 100019199 2021